

# WARBIXINTA KOOBAN EE FULINTA

Sheekada caafimaadka gobolkeenu keliya kuma eka jiritaanka ama maqnaanshaha cudur ama dhaawac. Caafimaadkeena waxaa ka mid ah sida xaaladaha kala duwan ay noogu saamaxaan inaan ku noolaano nolol caafimaad leh (goobta aan ku noolnahay, sida aan u tagno goobaha kale, hawada aan qaadano, iwm.).

Qiimeyntani waxay isu dubaridaysaa xog laga helay meelo kala duwan oo ka mid ah gobolka si aan u fahamno waxa saamayn kara caafimaadkeena. Waxay hiigsanaysaa in la sameeyo waxyaabaha soo socda:

- Sharaxaada sa xaaladaha arrimaha bulshada, nidaamyada, iyo qaab-dhismeedyada ay u saameeyaan caafimaadka reer Minnesota.
- Kor u qaadida xogaha ku jira nidaamyada, kuwaasoo muujinaya sida siyaasadaha iyo barnaamijyadu u abuuraan una jooqteeyaan xaaladaha caafimaadka.
- Si cad u sheeg halka iyo sida cunsuriyadda qaabaysan ay u saamaynayso caafimaadka ee ka jirta Minnesota.
- U muuji hantida, awoodaha, iyo kheyraadka bulshada sida ay ula xiriiraan caafimaadka.
- Muuji marka ururada iyo kooxuhu ka qayb qaadan karaan si wax looga qabto sinnaan la'aanta, iyadoo wax laga qabayo sinnaan la'aanta oo la wanaajinayo caafimaadka.

## Qiimeynta caafimaadka gobolka oo dhan ayaa sawir guud innaga siinaysa caafimaadka gobolkeena..

Waxay inoo sheegaysaa sheeko, wakhtigan lagu jiro ee ku saabsan arrimaha kala duwan ee saameeya caafimaadkeena ee ka jira Minnesota. Arrimahan waxaa ka mid ah bay'adeena, waxbarashada, guriyeynta, gaadiid-raaca, goobaha bulsheed, iyo qaar kaloo badan.

Qiimeynta caafimaadka gobolka oo dhan waxaa la sameeyaa qiyaas ahaan shantii sannaba mar. Waxay eegtaa xogta la uruuriyay in muddo ah iyo kooxaha kala duwan si loogu fahmo sida ugu fiican sida mawduucu u saamayn karo caafimaadkeena. Qiimeyntu ma ahan xog uruurin dhammaystiran oo lagu samaynayo xogta la heli karo oo dhan. Hase yeeshe, waxaa lagu uruuriyaa macluumaadka mawduucyo kala duwan oo ay tahay in loo arko inay bar bilow u yihiin waxyaabaha u baahan in si qoto-dheer loo baaro.

## Qiimeyntu waxaa lagu eegayaa dadka ku nool Minnesota iyo sida fursadda, dabiiciga, iyo ka mid ahaanshaha bulshada ay u saameeyaan caafimaadkeena.

Qiimeyntu waxay isticmaashaa isla afarta qeybood ee laga soo qaatay qiimeyntii 2017—dadka, fursadda, dabiiciga iyo ka mid ahaanshaha bulshada. Qeybahani waxaa lagu eegayaa xaalado kala duwan iyo sida ay u saameeyaan caafimaadkeena.

**Qoraal ku saabsan COVID-19:** Qiimeyntan waxaa ku jira xog ku saabsan safmareenka COVID-19, balse COVID-19 ma ahan waxa diirada la saarayo. Caqabadda qiimeyntan keliya kuma eka in la qoro saamaynta tooska ah ee COVID-19 uu ku yeeshay Minnesota iyo dadka ku nool Minnesota, balse waa in la aqoonsado saamaynta COVID-19 uu ku leeyahay arrimo badan oo qiimeynta lagu muujiyay.

**Helitaanka xogta:** Xog kooban oo gobolka oo dhan ah ayaa la heli karaa oo laga soo uruuriyay dadka qaarkood, sida dadka naafada ah, bulshada LGBTQ+ (leefto, khaniis, laba-jinsile, sinji-guur, iyo qadaf khaniis/jinsi su'aal ka taagan tahay), iyo qowmiyadaha gaarka ah iyo kooxo dhaqameedka. Metalaad la'aantan ayaa ka dhigaysa mid adag in si sax ah loo soo sheego caafimaadka iyo xaqsoor la'aanta caafimaadka ee ay dadkaan wajahaan. Shaqo dheeraad ah in laga qabto ayaa loo baahan yahay wayna socotaa si wax looga qabto daldalooladan xogeed.

PEOPLE

OPPORTUNITY

2

NATURE

BELONGING

## Dadka

Cidda aynu nahay, halka aynu ka nimid, iyo sida kala duwanaanshaheena dhabta ah iyo loo qaateenka ah ay door uga ciyaaraan qaabaynta caafimaadkeena.

- ▼ Guud ahaan, Minnesota waxaa la saadaalinayaa inay ku soo kordhaan ku dhawaad 900,000 oo deggane ah inta u dhaxaysa 2018 iyo 2053.
- ▼ Tirada reer Minnesota ee da'doodu tahay 85 jir iyo wixii ka weyn ayaa la filayaa inay in ka badan laba-jibaaranto 35-ta sanno ee soo socda, laga bilaabo 120,000 ilaa in ka badan 270,000.
- ▼ Dadyowga midabka leh iyo Hindida Maraykanka ayaa la saadaalinayaa inay ku soo kordhaan in ka badan 1 milyan oo deggane inta u dhaxaysa 2018 iyo 2053—oo ka badan saddex-meelood meel wadarta dadweynaha. Dhab ahaantii dhammaan korodhka ku iman doona sannadaha soo socda dadweynaha gobolka waxay ka iman doonaan dadyowga midabka leh.
- ▼ Gobolka metro ee toddobada degmo ah ayaa la saadaalinayaa inay ku soo kordhaan ilaa 924,000 deggane halka Greater Minnesota ay ka yaraan doonto qiyaastii 27,000 deggane inta u dhaxaysa 2018 iyo 2053.

### KU CUSUB QIIMEYNTAN:

Xogta dadweynaha ayaa laga qaadaa dadka ay haysato hoy la'aanta iyo dadka ku xiran xabsiyada gobolkeena. Dadkani inta badan waa kuwo aan la arki karin, inkastoo ay la kulmaan xaqsoor la'aanta caafimaadka marka ay raadsanayaan kheyraadka iyo taageerada si ay ugu noolaadaan nolol caafimaad leh.

## Fursadda

Fursadaha bulsheed iyo dhaqaale ee aan loo sinnayn waxay saameeyaan caafimaadkeena—waxbarashada, shaqada, dakhliga, guriyeynta, gaadiid-raaca, iyo in kaloo ka badan. Xogtu waxay daaha ka rogaysaa xaqsoor la'aanta joogtada ah ee sii socota inay saamayso kooxaha qaarkood marka lala barbardhigo kooxaha kale, waxayna sababtaa jiilal ay caafimaad-darro hayso.

- ▼ Sannadkii 2021, isku darka kharashka gaadiid-raaca iyo guriyeynta ee loogu talagalay qoyska caadiga ah ee deggan Minnesota (laba qof oo qaangaar ah, hal ilmo, 1.5 shaqaale) ayaa u dhigantay 21.8% dhex-roorka dakhliga qoyska.
- ▼ Sannadkii 2021, 20.2% ka mid ah dadka reer Minnesota ayaa sheegay in aysan raadsanin daryeel caafimaad (ilkaha, maskaxda, daawoyinka, daawaynta caadiga ah, ama daryeelka takhasusluhu bixiyo) kharash la'aan awgeed. Dadka qaarkood waxay aad ugu dhowdahay in aysan raadsan daryeel, oo ay ku jiraan dadka aan caymiska lahayn; aan lahayn qorsheyaal caymis oo gaar ah ama guud; Hindida Maraykanka, Hisbaanik/Laatiin da'aada 26 iyo 64 jir; qabeen xaalad raagta; ama uu soo galo dakhli gaaraya ama ka hooseeyo 200% midka heerka saboolnimada dawladda.

### KU CUSUB QIIMEYNTAN:

Haybta siyaasadda ee khuseysa fasaxa qoyska iyo fasaxa caafimaadka ee mushaarka leh ayaa qeexaysa sababta ay muhiim ugu tahay caafimaadka, noocyada sinnaan la'aanta ee jira, iyo siyaasadaha jira (deegaanka, gobolka, dawladda iyo hay'adaha).

## Dabeecadda

Caafimaadkeena waxaa qaabeeya ku xirnaanteena iyo is-dhexgalka aan la sameyno deegaanka dabiiciga ah. Tani waxaa ku jira dheefaha deegaanka (sida goobaha cagaaran, dhirta magaalada, hawada, iyo biyaha nadiif ah) iyo u-baylah noqoshadsa khataraaha deegaanka (sida wasakhawga hawada, qashinka, iyo biyaha wasakhaysan).

- ▼ Magaalooyinka Mataanaha ah, qiyaastii kalabar aagga todobada gobol ee Metro waxay ku jiraan ama u jiraan hal mayl aagga caddaaladda deegaanka: kaasoo ku dhex yaala aagga qabiil ee ay Dawladdu aqoonsan tahay ama ay deggan yihiin dad badan oo caddaan ah, dakhligoodu hooseeyo, ama aan si fican u aqoon Af-Ingiriisiga. Tani waxay qiyaastii dabooshaa 1.6 milyan oo qof, ama keliya kalabar dadka deggan Magaalooyinka Mataanaha. In Aaggaga Ka Baxsan Toddobada Degmo (Greater Minnesota), qiyaastii 55% aaggaga lagu beegsaday tirakoobka waa aagagaga cadaaladda bay'adeed oo ay ku jiraan 1.3 milyan oo qof (51% ka mid ah dadka deggan Aaggaga Ka Baxsan Toddobada Degmo).
- ▼ Minnesota waxay lahayd heerkul gaaraya 3.0 darajo Fahrenheit intii u dhaxaysay 1895 iyo 2020-kii, halka roobabka sannadlaha ay kordheen celcelis ahaan 3.4 inji.

### KU CUSUB QIIMEYNTAN:

Haybta siyaasadda ee khuseysa dhirta magaalada, ama inta uu le'eg yahay aagga cagaaran, ayaa qeexaysa sababta ay muhiim ugu tahay caafimaadka, noocyada sinnaan la'aanta ee jira, iyo siyaasadaha jira (deegaanka, gobolka, iyo dawladda).

## Ka mid ahaanshaha bulshada

Ka mid ahaanshaha bulshooyinkeena, iyo isku xirnaanteena ayaa wanaajin karta ama wiiqi karta caafimaadkeena inta aan noolnahay.

- ▼ Sannadkii 2021, dadka reer Minnesota waxay soo sheegeen celcelis ahaan 4.3 maalmood oo aysan maskax ahaan caafimaad qabin 30-kii maalmood ee la soo dhaafay, in ka badan laba jibaar bil kasta sida ay soo sheegeen 2013.
- ▼ Sida ku cad warbixinta waayeelada ee 2023-kii, Minnesota waxay kaga jirtaa kaalinta afaraad gobolada ugu caafimaadka badan qaranka ee ku habboon dadka waayeelada ah. Si kastaba ha ahaatee, tirada la jaangooyay ee Minnesota (hab xogta la isugu geeyo iyadoo la adeegsanayo halbeegyo) tilmaamaya dadka khatarta ugu jira ka go'doonka bulshada kuwaas oo da'doodu tahay 65 jir waa 32, iyadoo hal ay ka turjumayso sida ugu fican iyo 100 ugu xun ama ugu halis badan marka la eego go'doomida bulshada.
- ▼ Sannadkii 2022, 61% ka mid ah dadkii shuruuda buuxiyey ee ku noolaa Minnesota ayaa codeeyay, taasoo ahayd tiradii ugu badnayd ee codbixiyeyaal ah ee ay dawladdu diiwangeliso.

### KU CUSUB QIIMEYNTAN:

Haybta siyaasadda ee khuseysa helitaanka khad internet oo caalami ah ayaa qeexaysa sababta ay faa'iido ugu leedahay caafimaadka, xaqsoor la'aanta jirta, iyo siyaasadaha ka jira shirkadaha, degaanka, gobolka iyo dawladda.

## Sidee ayaa loo sameeyay qiimeyntan?

Qiimeynta waxaa la sameeyay iyadoo la raacayo hagista Iskaashatada Caafimaad ee Minnesota iyo Waaxda Caafimaadka ee Minnesota. Iskaashatada Caafimaad ee Minnesota ayaa isku keenaan iskaashatada bulsheed iyo Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH) si loo wanaajiyo caafimaadka iyo tayada noloshaha ee loogu talagalay dadka, qoysaska, iyo bulshooyinka Minnesota. Waxay ka kooban tahay madax ka kala socota qeybaha iyo aaggaga kala duwan ee Minnesota, oo uu isu keenay guddoomiyaha caafimaadka. Iskaashatada waxaa loo xilsaaray samaynta qaab-dhismeedka caafimaadka gobolka oo dhan, kaasoo ah qorshe hawleed ka caawinaya reer Minnesota oo dhan inay ku noolaadaan nolol caafimaad leh. Ereyga “Shaqaalaha iskaashiga” ee ku jira qiimeyntan wuxuu tilmaamayaa shaqaalaha Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH) ee xubinta ka ah Iskaashatada Caafimaad ee Minnesota. Shaqaalahan waxaa lagu aqoonsaday Lifaafa A.

Geedi-socodka samaynta qiimeynta caafimaadka ee gobolka oo dhan ayaa muhiim u ah isla sida ay muhiim u tahay warbixinta lafteeda. Waa geedi-socod iskaashi oo ay ku lug leeyihiin iskaashato badan, ku tiirsanaanta wareegyada jawaab celinta iyo talooyinka kooxahan.

- **Xog uruurinta:** Qiimeyntu waxay ku tiirsan tahay xogta laga helo hay'adaha iyo ilo badan oo ku baahsan gobolka iyo dalka oo dhan. Xogtan horay ayay u sii jirtay. Xogtan looma soo uruurin in loo adeegsado qiimeynta oo keliya. Wixii faahfaahino dheeraad ah oo ku saabsan uruurinta xogta, fadlan ka eeg Lifaafa A.
- **Ka-qaybgelinta bulshada:** Shaqaalaha Iskaashatada Caafimaad ee Minnesota waxay qabteen hawlo badan oo kaqaybgelin bulsheed ah si ay talooyin ugu biiriyaan inta ay qiimeynta socoto. Hawlaha waxaa ka mid ahaa liiska kaqaybgalka bulshada, wadashekeysiyada kooxeed, sahanka ku saabsan awoodaha gobolka, iyo faallooyinka dadweynaha. Shaqaaluhu waxay qorsheeyeen hawlo iyagoo fahamsan in bulshooyinku ay ku daalaan kaqaybgelinta oo aysan doonayn in lagu xukmiyo oo keliya waxyaabaha ay ku liitaan. Tirakoobka dadweynaha ayaa laga soo uruuriyay oo keliya sahannada awoodaha gobolka waxaana loogu talagalay dadka buuxiyay foomka qoran ee faallooyinka dadweynaha. Tirakoobyadani waxay muujinayaan in sambaladani aysan ahayn kuwo metalayo gobolka. Wixii faahfaahino dheeraad ah oo ku saabsan kaqaybgelinta bulsheed, fadlan ka eeg Lifaafa A, B, C, D, iyo E.

## Maxaa xiga?

Qiimeyntan ayaa bixinaysa macluumaad loo isticmaali doono in lagu horumariyo qaab-dhismeedka lagu wanaajinayo caafimaadka gobolka oo dhan. Qaab-dhismeedku wuxuu qeexayaa aaggaga caafimaad ee mudnaanta leh iyo xeeladaha wax looga qabanayo. Iskaashatada Caafimaad ee Minnesota waxay kulmi doonaan 2024 si loo qorsheeyo loona horumariyo qaab-dhismeedkan. Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH) iyo Iskaashatada Caafimaad ee Minnesota waxay ku dhiirigeliyaan ururada bulshada, wakaaladaha dawladda, iyo bahwadaagta kale inay ku soo biiraan geedi-socodkan.

## WARQAD KA TIMID GUDDOOMIYAHA

Waxaan ku faraxsanahay inaan idinla wadaagno Qiimeynta Caafimaadka ee Gobolka Minnesota oo dhan ah. Shaqaalaha Iskaashatada Caafimaadka ee Minnesota (Healthy Minnesota Partnership) iyo Iskaashatada Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH Partnership) waxay soo saareen warbixin ballaaran, oo ka kooban xog iyo aragtiyo ku saabsan xaaladda caafimaad ee dadka ku nool Minnesota. Arrimaha caafimaadka ee aan muujino waxay ka turjumayaan jawaab-celinta aan Iskaashatada ka helno, dib-u-eegista lagu sameeyay qiimeynta baahiyaha caafimaadka bulsheed ee la xushay, xogta sahanka, iyo faallooyin ay ka bixiyeen dadweynaha. “Macluumaadka kooban” ee caafimaadka Minnesota ee wakhtigan lagu jiro, qiimeyntu waxaa loogu talagalay inay u noqoto dhigaal xogeed qof kasta oo doonaya inuu wanaajiyo caafimaadka gobolkeena iyo inay noqoto dukumeenti aasaasi ah oo aan ka diyaarino Qorshaha Wanaajinta Caafimaadka Gobolka.

La yaab ma leh, xogta inteeda badan waxay is waafaqsan yihiin waxyaabo aan horay u soo aragnay. Gobolkeenu si fiican ayuu ugu dhigmaa gobolada kale marka loo eego halbeegyada caafimaadka, qayb ahaan waxaa sabab u ah gaaritaanka guud ee waxbarashada sare, shaqo la'aanta yar, iyo heerarka hoose ee caymis la'aanta. Si kastaba ha noqotee, xogtu waxay mar kale na tusinaysaa in dadka loo aqoonsan yahay inay yihiin Madowga iyo Hindida Maraykanka ee ku nool Minnesota ay leeyihiin natiijooyin caafimaad oo xun marka loo eego halbeegyada badankooda, taasoo ka turjumaysa caqabadaha joogtada ah ee lagala kulmo in meesha laga saaro sinnaan la'aanta caafimaadka ee ka jirta gobolkeena. Xogtu waxay keliya qayb ahaan daaha ka qaadaysaa saamaynta ka dhalatay safmareenka COVID-19, kaasoo aynu ognahay inuu sare u qaaday baahida loo qabo daryeelka caafimaadka. Baahiyahaas kordhay ayaa ka dhashay daryeelka la iska dhaafay intii lagu gudajiray safmareenka; hoos u dhac ku yimid caafimaadka maskaxda walbahaar awgiis, go'doonka, iyo dhimashada dadka ay jeclaayeen; helitaan la'aanta daryeel ee ka sii dartay iyadoo ugu wacnayd dhimista shaqaalaha daryeelka caafimaadka, xiritaanka isbitaalada iyo rugaha caafimaadka, iyo joojinta adeegyada; Saamaynta dhaqan-dhaqaale ee ka dhalatay safmareenka, taasoo keentay shaqo la'aan, hoy la'aan, iyo cunto-yari baahsan oo ku dhacday dad badan; iyo COVID-ka raaga.



Waxayna tani dheeraad ku ahayd dhibaatooyinka kale ee bulsheed ee jiray – sida dadka faraha badan ee ku jira xabsiyada, rabshadaha lagu gaysto hubka, iyo saboolnimada – kuwaasoo keena dhibaatooyin caafimaad oo gaar ah, keliya aan u keenin shakhsiyadka balse sidoo kale qoysaska iyo bulshooyinka.

Iskaashatada Caafimaad ee Minnesota ayaa mar kale iftiimayay cunsuriyadda inay tahay mid ka mid ah sababaha aasaasiga u ah natiijooyinka caafimaad ee xun. Inta aynu sii wadno diyaarinta Qorshaha Wanaajinta Caafimaadka Gobolka, haddii ujeeddadu tahay in la baabi'yo cunsuriyadda, waxaan u baahan doonaa inaan si gaar ah u xusno qaababka ay cunsuriyaddu u saamayso caafimaadka. Nasiib-darroose, weli waa iska sidii hore waxaan haynaa xog badan oo ku saabsan isirka balse sidoo kale xog yar oo ku saabsan cunsuriyadda.

Taasi waa qayb ka mid ah taariikhda qiimeynta caafimaadka oo ay tahay inaan ku xisaabtano – inaan uruurinno macluumaadka ku saabsan aqoonsiyada bulshada ee jawaab-bixiyeyaasha halkii aan ka uruurin lahayn xogta ku saabsan dhaqamada iyo siyaasadaha wax ka geysanaya kala duwanaanshaha la taaban karo ee isireed ee ka jira helitaanka kheyraadka, fursadaha, macluumaadka, iyo awoodda. Waa inaan caddeynaa cidda, waxa, goorta, halka, iyo sida ay u dhacdo cunsuriyadda, iyadoo la aqoonsanayo in cunsuriyaddu ay isku beddeli karto sida fayraska oo kale. Waxay si kala gedisan ugu dhacdaa dadka iyo bulshooyinka midabka leh in muddo ah, iyadoo ku salaysan goobaha, jinsiga, qowmiyadda, da' kooxeedka, isku xirnaanshaha diimeed, jinsiyadda, heerka socdaalka, dookha galmada, heerka naafanimada, iyo muddada iyo taariikhda meeshan hadda aan ugu yeerno Minnesota. Sidaas darteed, ayaa loo soo saaray baaqyada ah in si dhow loola shaqeeyo dadka sida xun ay u saameysay kala duwanaanshaha isireed ee caafimaadka si aynu si sax ah ugu fahamno qaababka kala duwan ee ay cunsuriyaddu u shaqayso, una buuxino daldaloolada ka jira hababkeena xog uruurinta ee soo jireenka ah, iyo in si kalsooni leh loo ogaado waxyaabaha mudnaanta u leh barnaamijyada caafimaadka iyo wax-ka-beddelka siyaasadda.

Waa inaan sidoo kale si adag u diidno qaar ka mid ah waxyaabaha khaldan ee aasaaska u ah cunsuriyadda. Si aan si xooggan uga wada shaqayno sidii aan u wanaajin lahayn caafimaadka iyo badqabka, waa inaan diidno kala qeybsanaanta, “annaga iyo ayaga,” waana inaan dhinac iska dhigno cabsidayada aynu ka qabno kheyraadka nagu yar. Markaan la imaanayno xalka la beegsanayo ee loogu talagalay bulshooyinka maxalliga ah, waa inaan sidoo kale isku imaano innagoo isiro kala duwan leh oo goobo kala duwan joogna si aan meesha uga saarno caqabadaha la wadaago ee ku gudban caafimaadka taamka ah. Waa inaan xusuusano in aynu laba shay samayn karno. Waxaan wax ka qaban karnaa mahadhooyinka nololeed ee kala duwan waxaana adkayn karnaa wax ka qabashada arrimaha khatarta ku ah bulshada ee gacanta ka geysta natiijooyinka caafimaadka ee xun ee saameeya bulshooyinka Caddaanka u badan ee ku nool miyiga Minnesota iyo xaafadaha ay u badan yihiin dadka Madowga iyo Maariinka ah ee Metro. Si wadajir ah, ayaynu ugu taageeri karnaa hababka ku saleysan hantida ee kordhiya isku xirnaanta bulshada iyo ka mid ahaanshaha bulshada,

awood-siinta dadka iyo bulshooyinka, kordhinta aayo-ka-tashiya, wanaajiyi ka qaybgalka bulshada, iyo sharafta, halkii aan ka faquuqi lahayn, dhaqanka – dhammaan hababka la xaqiijiyay in lagu dhowro caafimaadka. Si wadajir ah, waxaan mustaqbalka u dhisi karnaa gobol kaasoo waaxaha caafimaadka dadweynaha, isbitaallada iyo rugaha caafimaadka, gaar ahaan bixiyeyaasha kabka dakhliga, ururada bulsheed, iyo qoysasku aysan u baahnayn inay qaadaan culeyska daran ee ka dhasha nidaam qarriban.

Marka aynu isu diyaarinayno mustaqbalka, waxaan ku tashanaynaa awoodda gobolkeena. Waxaan ogaanay in ka qaybgelinta la sameeyay xilligii qiimeyntan in Minnesota ay heerar sare u gaarayso qaabab kala duwan. Dadka ku nool Minnesota waxay ka faa'iideystaan barnaamijyo badan oo taageera qoysaska; jardiinooyinka tirada badan, garoommada ciyaaraha, iyo goobaha kale ee ku yaala bannaanka ee la geli karo, si fiican loo dayactiray, loona dhawro; hay'ado aan faa'ido-doon ahayn oo firfircoon, kala duwan, oo bulsheed; iyo fursado badan oo isxilqaam ama ku lug lahaanshaha bulshada. Kuwani waa sifooyin goboleed oo aan ku faani karno aana ka dhigan karno aasaas marka aynu kor u qaadi rabno caafimaadka iyo fayogabka.

Qiimeyntan ayaa dhigaal u noqon karta dad badan oo ku nool Minnesota kuwaasoo ka wadashaqaynaya bulshada dhexdeeda iyo bulshooyinka kala duwan iyo waaxaha kala duwan si ay u abuuraan gobol uu qof kasta si dhab ah ugu horumari karo, iyadoo aan loo eegin cidda qofku yahay, halka uu ku nool yahay, jinsigiisa, shaqada uu qabto, inta ay le'eg tahay lacagta uu sameeyo ama hantida uu haysto, ama cidda uu jecel yahay. Aad ayaan ugu mahadcelinayaa dhammaan dadka qaybta ka ah Iskaashatada Caafimaad ee Minnesota tan iyo imminka, waana ku faraxsanahay qorsheyaasha lagu ballaarinayo laguna kala duwayo Iskaashatada si codad badan oo bulsheed loo helo. Aad baad u “mahadsantihiin” idilkiin shaqaalaha Iskaashatada ee soo saaray warbixintan aadka u wanaagsan iyo dhammaan dadka aaminsan inaan isbeddel soo kordhin karno.